# Lambarka Bulshada Ee Dadka Qaba HIV/AIDS

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Macaashka waxaa laga bixiyaa laba barnaamij | 1 |
| Sidee ayaa looga soo baxa shuruudaha macaashka naafada ee Lambarka Bulshada? | 2 |
| Maxaan ka helayaa Lambarka Bulshada? | 2 |
| Sidee ayaan xaq ugu yeelanayaa lacagta la siiyo dadka naafada ee SSI? | 2 |
| Sidee ayaan u codsadaa macaashka | 2 |
| Sidee ayaad go'aan uga gaareysaan codsigeyga? | 2 |
| Side ayaan u dadajin karaa codsigeyga? | 3 |
| Maxaa dhacaya haddii aan shaqada dib ugu laabto? | 3 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 3 |


Haddii aad qabto HIV/AIDS oo aadan shaqeyn karin, waxaa laga yaabaa in aad xaq u yeelato macaashka Maamulka Lambarka Bulshada. Xaaladaadu waa in ay noqotaa mid ugu yaraan ku dhamaaneysa sanad ama ilaa qofku ka geeriyoodo waana in ay tahay mid khatar ah oo kaa hor istaageysa inaad qabato shaqo dakhli kaa soo galo. Lacagta aad shaqeysaneyo waa ayaanu u tixgelinay mid taaban karo oo si wanaagsan isu bedeleysa sanad kasta. Xogta ugu dambeysa ee tirokoobka, kala soco sanadlaha *Dhameystirka Update* (Publication No. 05-10003-SO).

Haddii ilmahaagu qabo HIV/AIDS waxaa suurdtogal inuu xaq u yeesho Dakhliga Kabitaanka ah ee Lam-barka Bulshada (SSI) haddii dakhliga qoyska soo gala yar yahay.

## Macaashka waxaa laga bixiyaa laba barnaamij

Macaashka naafanimada waxaa laga bixiyaa laba barnaamij: Ceymiska naafada ee Lambarka Bulshada waa mid logu talo galay dadka bixiyey canshuurta Lambarka Bulshada iyada oo Barnaamika Kabitaanka Dakhliga loogu talo galay dadka dakhligooda iyo hantidoodu yar tahay. Haddii macaashka Lambarka Bulshada ee lagu siiyo uu aad u hooseeyo oo dakhliga iyo hantida ku soo gasha yar yahay, waxaa suur-togal ah in aad barnaamijyo kale xaq u yeelato.

## Sidee ayaa looga soo baxa shuruudaha macaashka naafada ee Lambarka Bulshada?

Marka aad shaqeyso oo bixiso canshuurta Lambarka Bulshada, waxa aad heleysaa dhibcaha Lambarka Bulshada. (Dad intooda badan ugu badnaana Afar dhibcood ayey helaan sanad kasta). Inta sano ee lagaa doonayo in aad aad shaqeysay si aad u qaadato macaashka naafada ayey ku xiran tahay inta ay da'daadu tahay marka aad naafada qaadaneyso guud ahaan, waa in aad shaqeyneysay shan oo ka mid tobanka sano ee ka horeysay inta aadan noqon naafada. Shaqaalaha da'da yar waxaa laga doonayaa sanado shaqo oo taas ka yar. Haddii codsigaaga la ogolaado, ,acaashka ugu horeeya ee naafada Lam-barka Bulshada waxaa lagu siinayaan marka ay kuu buuxsanto lix bilood ka dib taariikhda aad noqotay naafada.

## Maxaan ka helayaa Lambarka Bulshada?

Macaashka aad bil kasta heleyso waxa uu ku xiran yahay lacagta aad shaqyesay markii aad shaqeyneysay. Waxaa kale oo aad xaq u yeelaneysaa Medicare haddii aad qaadaneysay macaashka naaada 24 bilood. Medicae waxa ay kaa caawineysaa in aad bixiso isbitaalka iyo xarumaha dadka lagu hayo, sheybaarka, daryeelka caafimaadka ee guriga iyo adeegga caafimaadka. Macluumaad dheeraad ah oo Medicare ku saabsan waxa aad ka heli kartaa, *Medicare* (Publication No. 05-10043-SO).

## Sidee ayaan xaq ugu yeelanayaa lacagta la siiyo dadka naafada ee SSI?

Haddii aad shaqeysay in kugu filan oo aad macaashka Lambarka Bulshada aad xaq ugu yeelato ama macaashka aad hesho uu aad u hooseeyo, waxa suurogal in aad xaq u yeelato lacagaha SSI haddi dakh-liga iyo waxa ku soo gala ay aad u hooseeyaan.

Haddii aad qaadato SSI, waxa ay u badan tahay in aad xaq u yeelaneyso Barnaamijka Kabitaanka Gar-gaarka Nafaqada (SNAP) iyo Medicaid.  Medicaid ayaa bixineysa biilasha caafimaadka marka aad isbi-taalka ku jirto ama banaanka lagugu daaweynayo. Gobolada qaarkood, Medicaid waxa ay bixisaa goobaha dadka lagu hayo, kalkaaliye caafimaad oo gaar ah, iyo daawada loo qoro dadka qaba cudurka HIV/AIDSka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Medicaid la xiriir xafiiska degaanka ee adeegga dadweynaha.

## Sidee ayaan u codsadaa macaashka

Waxa aad ka codsan kartaa macaashka naafanimada ee Lambarka Bulshada ***www.socialsecurity.gov***, ama aad soo wici kartaa, **1-800-772-1213**, si aad balan uga sameysato aad uga diiwaangeliso macaashka naafada xafiiska degaanka ama uu qof shaqaale ah telefoonka kaaga qaado macluumaadka. Wareysiga codsiyada naafada waxa uu qaataa qiyaastii hal saac. Haddii aad dhagaha la'dahay ama maqalku kugu adag yahay, waxa aad soo wici kartaa lambarka lacag la'aanta ah ee TTY, **1-800-325-0778**, inta u dhax-eysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Telefoonada aad noo soo dirtaan waa kuwo dhamaantood qarsoodi laga dhigayo, qof ka tirsna shaqaalaha Lambarka Bulshada ayaa dusha kala socda telefoonada waayo waxa aan dooneynaa in adeeg aad ku qanacdaan la idiin qabto.

## Sidee ayaad go'aan uga gaareysaan codsigeyga?

Dhamaan codsiyada ay soo gudbiyaan dadka qaba cudurka HIV/AIDS waxaa looga shaqeeyaa sida ugu dhaqsaha badan. Lambarka Bulshada waxa ay la shaqeeyaan hay'adaha goblada ee Adeegga Caddeynta Naafanimada.

*(rogad)*

Hay'adaha gobolka ayaa eegaya macluumaadkaaga iyada oo dhakhtarkaagana u soo diraa xogtaada oo go'aan ka gaara.

Waxaanu ku siineynaa markiiba macashka SSI ilaa lix bilood ka hor inta aynaan gaarin go'aanka kama dambeysta ah haddii:

- Aadan shaqo heyn;
- Waxa aad akhrin kartaa sharciyada SSI ee ku saabsan dakhliga iyo waxyaabaha ku soo gala; iyada oo
- Dhakhtarkaaga iyo goobaha kale ayaa caddeynaya heerka cudurku ku haya ee HIV gaarsiisan yahay iyo in aad ka soo baxday shuruurdaha caafimaad ee u degsan.

## Side ayaan u dadajin karaa codsigeyga?

Waxa aad caawin kartaa in aad dadajiso codsigaaga adiga oo keena macluumaadka qaarkiis marka aad codsaneyso. Waxaa ka mid noqon kara:

- Lambarkaaga Bulshada iyo shahaadada dhalashada iyo Lambarka Bulshada iyo shahaadooyinka dhalashada ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan ee doonaya in ay codsadaan macaashka, iyo
- Nuqulkii u dambeeyey ee foomka W-2. (Haddii aad codsaneyso SSI, waxaanu u baahaneynaa macluumaadka dakhligaaga iyo meelaha wax kaa soo galaan; tusaale ahaan, warbixinta bagiga, dii-waanka shaqo la'aanta, caddeynta kirada iyo mulkiyadda gaariga).

Waxaa kale oo aan kaa doneynaa macluumaad ku saabsan:

- Magacyada iyo cinwaanada dhakhaatiirta, isbitaalada iyo bukaan socod eegtooyinka lagugu daweeyey.
- Sida HIV/AIDS saameyn ugu yeeshay nolol maalmeedkaaga, sida nadaafadda, adeegga, cunto ka-rinta, raacista basaka, iwm.; iyo
- Shaqooyinkii aad soo qabatay 15kii sano ee la soo dhaafay.

Waxaa intaa dheer, waxa aan weydiisaneynaa dhakhtarkaaga inuu foomka aan ku ogaaneyno sida uu HIVgu saameyn ugu yeeshay noloshaada. Adiga iyo dhakhtarkaaga waxaad ka heli kartaan foomka "SSA-4814" ee dadka waaweyn ama "SSA-4815" ee caruurta ***www.ssa.gov/forms/index.html*** ama waxa aad soo wici kartaan lambarka 800 si aad u weydiiso foomka kiu haboon. Marka dhakh-tarkaaga uu buuxiyo oo saxiixo foomka saxa ah, noo keen foomka ama noo soo dir.

## Maxaa dhacaya haddii aan shaqada dib ugu laabto?

Haddii aad shaqada dib ugu noqoto, waxaa jira sharciyo u gaar ah oo kuu ogolaanaya in macaashku kuu sii socdo. Sharciyadan waa u muhim dadka qaba HIV/AIDS oo ku noqon kara shaqada marka ay wanaagsan yihiin.

Macluumaad ku saabsan xeerarka, weydii shaqaalaha Lambarka Bulshada nuqul ka mid ah dabacadda publication, *Working While Disabled — How We Can Help* (Publication No. 05-10095-SO).

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka

*(rogad)*

bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;

- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaababaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

## Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



**Social Security Administration**
Publication No. 05-10019-SO | April 2017
Lambarka Bulshada Ee Dadka Qaba HIV/AIDS
Social Security For People Living With HIV/AIDS (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha